# Caafimaadka

Nidaamka Caafimaadka
Ceymiska Xanuunada iyo Shilalka
Helitaanka Daawada
Uurka / Dhalmada
Caafimaadka Dhimirka
Geerida

# Nidaamka Caafimaadka

Nidaamka Caafimaadka ee Swiiserlaan waa mid si aad u fiican loo dhisay. Dhammaan bulshada ku nool waddanka waxaa si siman loogu waajib yeelay inay ku jiraan Ceymiska Shilalka iyo Xanuunada. In badan oo kamid ah Goobaha Dhaqaatiirta, Farmishiyaasha iyo Isbitaalada ayaa daboolo baahiyaha caafimaad.

## Nidaamka Ceymiska

Dhammaan bulshada ku nool waddanka waxaa waajib ku ah inay galaan Ceymiska Shilalka iyo Xanuunada. Qofkii ku cusub wadanka waa inuu galaa Ceymisyada saddexda bilood ee ugu horeeyso marka uu soo galo wadankan. Dhallaanka waa in saddex bilood kadib dhalashadooda loo sameeyaa Ceymiskan. Adeegyada uu bixiyo Ceymiska qasabka ah waxaa u dagsan sharciyo. Dhammaan dadka ku jiro Ceymiska waxay xaq u leeyihiin in si iskumid ah loo daaweeyo.

## Maalgelinta

Nidaamka Caafimaad ee Swiserlaan waxaa si wadajir ah u maalgeliyo dowladda (Bund, Kantone, Gemeinden), Milkiilayaasha goobaha shaqada iyo dadka caadiga ah. Dadka caadiga ah waxay bixinayaan bil walba qarashaadka Ceymiska Xanuunada iyo Shilalka. Qiimaha waxaa la jaangooyaa sanad walbo, gobolladana way ku kala duwanyihiin. Qofkii Xanuunsada ama shil galo qiimo dheeraad ah waa inuu dhiibo sanad walbo xaddi go'ana uu jiro oo wax kabadan uusan dhiibaynin (Franchise und Selbstbehalt).

## Tarjummaanada

Ma ahan mid fudud inaad kula sheekeysato af qalaad, dhaqaatiirta, Farmashiyaasha ama kuwa ka howl gala daryeelka Caafimaadka. Sidaas darteed, isbitaalada qaar waxay bixiyaan adeegyo Tarjumaano loo carbiyay Tarjumida afka iyo dhaqanka oo bilaash ah. Bukaanada waa inay waqti ku filan kahor sii sheegaan inay u baahanyihiin. Sidoo kale tarjummaanadan waxaa loo carbuunan karaa booqashada isbitaalada ama xaalado kale adiga oo iska bixinaya qiimaha adeegga.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gesundheit/gesundheitssystem

# Ceymiska Xanuunada iyo Shilalka

Qofkastoo ku nool Swiserlaan waa inoo ku jiraa Ceymiska xanuunada iyo shilalka. Shirkadaha Ceymisyada gaarka loo leeyahay ayaa bixiya kharashaadka ku baxo, shilalka, xanuunnada iyo Uurka. Labadaan Ceymis waa waajib inaad gasho saddex bilood gudahood imaanshaha Swiserlaan kadib.

## Ceymiska Xanuunada (Grundversicherung)

Dhammaan dadka ku dhaqan wadanka Swiserlaan waxay ku qasban yihiin inay sameystaan Ceymiska Xanuunada ee waajibka ah (Grundversicherung). Qofkii soo dago Swiserlaan waxuu haystaa muddo 3 bilood ah oo ku sameysto Ceymiska. Hadii uu mudadaas dhexdeeda xanuunsado, kharashaadki ku baxay waxaa dib ugu celin Ceymiska uu geli doono. Ceymiska waajibka ah waxaa laga sameysan karaa Shirkadaha Ceymiska gaarka loo leeyahay ee bixiya Xanuunada (Krankenkassen). Kala doorashada Shirkadahaas waxaad u tahay xor. Shirkadaha Ceymiska xanuunanada waa inay qaabilaan dhammaan dadka ku dhaqan wadankan Swiserlaan.
Dadka ku jira Ceymiskan waxay dhiibaan bil walbo Lacag. Lacagaha la dhiibo cadadkooda waxay ukala sareeyaan hadba shirkada Ceymiska ee aad ku biirtay ama nooca ceymiska gaarka ee aad dalbanayso sidaas awgeed ayay u fiicantahay in isbarbardhig lasameeyo inta aan la sameysan kahor. Sanadwalbo dhammaadka bisha Nofeembar ayaad shirkada caymiska ku badalan kartaa shirkad kale. Ceymiska Caafimadka qasabka ah ma bixiyo kaliya kharashaadka ku baxo marka qof xanuunsado ee waxay bixiyaan sidoo kale kharashaadka hooyada uurka leh iyo dhalitaanka. Waxyaabaha ay bixinyaan Ceymisku waxaa jiro Xeerar sharciyaysan oo u dagsan.
Fiiro Gaar ah: Kharashaadka ku baxo daaweynta ilkaha ama ookiyaalaha indhaha caadi ahaan qofkasto isaga ayaa iska bixinaayo ama hadii uu ku jiro Ceymiska Xanuunada ee dheeraadka ah oo aan qasabka ahayn.

## Ceymiska Shilalka

Shaqaalaha si toos ah ayay ugu jiraan Ceymiska shilalka dhaco saacadaha shaqada iyo fasaxa haddii ay shaqeeyaan in kabadan 8 saacadood usbuucii. Qofkii 8 saacadood kayar shaqeeyo waa inuu goonidiisa u galaa ceymiskaas. Dad gaarka u shaqeysto ee ganacsatada ah iyo dhamaan dadka aanan shaqeyna sidoo kale. Dadka aanan shaqeynin waa inay Shirkadooda Ceymiska Xanuunada (Krankenkasse) ka galaan Ceymiska Shilalka. Dadka gaarka u shaqaysta sidoo kale iyagana waxay iska diiwaangelin karaan Shirkadaha kale ee Ceymiska Shilalka bixiyo. Dadka ku jiro Caymiskan waa inay bil walbo bixiyaan lacagaha Ceymiska. Dhammaan dadka shaqeeyo waxaa bil walba si toos ah mushaharkooda looga jaraa lacagaha Ceymiska shilalka.

## Qiimo dhimista kharashaadka Ceymiska

Qof waliba oo aanan awoodin inuu iska bixiyo kharashaadka Ceymiska xanuunada waxuu xaq uleeyahay caadiyan in laga bixiyo Ceymiska waajibka ah ee xanuunada (Prämienverbilligung). Si lagaaga bixiyo kharashaadkan waa inaad buuxisaa warqadaha lagu dalbanayo adigoo cadeynaayo kharashaadka kusoo galo iyo hantidaada. Hadii la aqbalo dalabkaada waxa lagaa bixinaa kharashadkii laga bilaabo bishaas. Hay'adda Kaalmada Bulshada (Amt für Sozialbeiträge) ayaa kusiin doonto macluumad kusaabsan (Prämienverbilligung) codsigaagana kaa qaban doonto.

## Ceymiska Caafimadka dheeraadka ah

Si xor ah ayuu qof walbo u sameysan karaa Ceymiska Xanuunada waajibka ah mid ka dheeri ah (Zusatzversicherungen). Adeegyada ay bixiyaan waxaa kamid ah bixinta kharashaadka aysan bixin midka waajibka ah. Tusaale ahaan, daaweynta ilkaha. Ceymiska dheeriga ah waxaa laga sameysan karaa inta badan dhammaan Shirkadaha ceymiska xanuunada. Shirkadaha iyagaa xor u ah in inay qaabilaan qofka sameysanayo ceymiska dheeriga iyo inkale amaba waxay dul dhigi karaan shuruudo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gesundheit/kranken--und-unfallversicherung

# Helitaanka Daawada

Inta badan Qofkii xanuunsado ama shil galo waxaa haboon inuu marka hore aado Dhaqtarka guriga. Xanuunada ama shilalka fudud waxaa sidoo kale laga heli karaa farmashiyaasha caawin. Kaliya xaaladaha aadka u daran ee degdeg ah ayaa fiican in loo aado isbitaalada.

## Farmashiyaasha

Farmashiyaasha waxay iibiyaan daawoyinka dhaqtarka soo qoro iyo daawoyinka kale oo dhan. Xanuunada fudud waxaa haboon in marka hore lala tago farmashiyaha. Howlwadeenada Farmashiya waa dad aad tababaran wayna caawiyaan macaamishooda. Farmishaha xaaladaha degdega ah ee ku yaalo Petersgraben 3 wuxuu furanyahay sidoo kale habeenkii iyo maalmaha sabtiga iyo axada. Sidaas darteed ayaa hadii loo baahdo daawo degdeg ah looga heli karaa halkaas.

## Dhaqtarka guriga / Dhaqtarka Caruurta

Wadanka Swiserlaan dad badan ayaa leh dhaqtarka ama dhaqtarada guriga (Hausarzt oder Hausärztin). Dhaqaatiirtan waxay yaqaanin taariikhda xanuunada kusoo maray waana qofka koowaad ee lagala hadli karo dhibaatoyinka caafimaad. Caruurta waxay leeyihiin dhaqaatiirta caruurta. Hadii loo baahdana iyaga ayaa udiraayo bukaankooda isbitaal ama dhaqaatiir taqasus ah. Kaliya xaaladaha aadka u daran ee degdeg ah ayaa fiican in toos loo aado isbitaalada. Xaaladaha kale degdeg ah ee dhaco wax kabaxsan waqtiyada ay furanyihiin goobaha dhaqaatiirta, waxa jiro lambar la wici karo oo furan habeen iyo maalinba (Medizinische Notrufzentrale, MNZ). Waxaana laga wici karaa waqti walbo lambarkaan 061 261 15 15. Xaaladaha kale degdeg ah ee kudhaco Caruurta iyo dhalinyarada wax kabaxsan waqtiyada ay furanyihiin goobaha dhaqaatiirta Caruurta, waxa jiro taleefanka Medgate Kids Line ee 0900 11 44 11. Lambarkan ma ahan bilaash.

## Dhaqtarka ilkaha

Kharashaadka Daaweynta ilkaha caadiyan waa inuu qofka isaga iska bixiyaa. Waxaa jiro laakin Ceymiska dheeraad ah oo la sameysan karo si uu kaaga bixiyo qarashaadka daaweynta ilkaha. Caruurta aado Iskuullada waxay xaq u leeyihiin sanadkiiba hal mar baaritaan ilkaha oo bilaash ah. Warbixin kusaabsan waxaa kula wadaagayo iskuulka.

## Isbitaalka / Qaybaha Gargaarka degdega ah

Marka ay noqoto in qof aado isbitaalka waxaa badanaa isaga ama iyada loo diiwaangeliyaa dhaqtar. Dadka aadka u daran waxaa haboon inay toos u tagaan qaybta gargaarka degdega ee isbitaalka. Hadii qofku suganyahay qatar nololeed ama u baahanyahay in bukaanka loo qaado isbitaal, waxaa la wici karaa lambarka 114. Xaaladaha degdeg ah ee aan aadka u darnayn waxaa ku shaqo leh dhaqaatiirta guriga.

## Kalkaaliyaha Guriga

Dadka xanuunsan ama dadka qabo baahiyaha gaarka ah doonayana in lagu caawiyo guryaha, waxay dalban karaan Kalkaaliyaasha Caafimaadka ee ka baxsan isbitaalada (Spitex). Howlwadeenadan Caafimaad waxay ugu tagaan guryahooda bukaanada si ay u daryeelaan ama uga caawiyaan howlaha guriga. Adeegan waxaa xaq u leh dadka sababo xanuun, shil, da', dhibaatoyinka uurka ama umusha dartood ugu baahan in la caawiyo. Qaybo kamid ah kharashaadka waxaa dusha saarto Ceymiska Caafimaadka guud. Marka laga soo tago Spitex ka Basel waxa kaloo jiro kuwo aad u badan oo bixiyo Adeegyada qaaska ah ee Spitex.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gesundheit/medizinische-versorgung

# Uurka / Dhalmada

Haweenka uurka leh kuma qasbana baaritaanada muhiimka ah inay iyaga iska bixiyaan. Sidoo kale kharashaadka dhalmada waxaa la wareego Ceymiska caafimadka ee guud. Dhalmada kahor iyo kadib waxay waalidka heli karaan talooyin bilaash ah.

## Adeegyada uurka iyo dhalmada

Adeegyada Caafimaad ee la xiriira Uurka ama dhalmada waxaa kharashkooda qaba Ceymiska Caafimaadka (Grundversicherung). Adeegyadan waxaa ku jiro baaritaanada Dhalmada kahor ee joogtada ah, dhalmada qudheeda iyo waxii kadambeeyo oo daryeel ah. Haweenka uurka leh waa in waqti hore ay u tagaan dhaqar, dhaqtarad ama umuliso. Isbitaalada iyo umulisooyinka waxay bixiyaan sidoo kale Koorsoyinka diyaar garoowga dhalmada (Geburtsvorbereitungskurse). Waxaa jiro koorsooyin qaas u ah dadka ajaanibta ah. Waxaa lagu dhali karaa isbitaal, goobaha lagu dhalo ama guryaha.

## Dhalmada kadib

Swiserlaan waa wax caadi ah in lala taliyo waalidka dhalmada kadib. Sidaas darteed Waxaa jiro Xarumaha latalinta waalidka (Elternberatungsstelle). Waxay kusiinayaan wacyigelin kusaabsan, koriinka, nafaqaynta iyo daryeelka dhallaanka. Talobixintan waa bilaash. Hadii loo baahdo baaritaano kale oo lagu samaynay Hooyada iyo dhallaanka waxaa soo sheegi doono dhaqtarka, dhaqtarada ama umulisada. Waxaa aad u muhiim ah in ugu dambayn 3 bilood jir markuu gaaro dhalaanka loo sameeyo Ceymiska Caafimaadka iyo Ceymiska Shilalka. Waxaa ugu fiican in loo sii sameeyo inta ubadku dhalan kahor.

## Tallaalka

Waa la isku dhiirigeliyaa in caruurta laga talaalo waqti fiican xanuunada qaar. Laakin tallaalka ma ahan mid waajib ah. Talaalada lagu taliyay caadi ahaan waxaa bixiyo Ceymiska Caafimaadka. Dhaqtarka caruurta ama Xarunta latalinta waalidka ayaad kahelaysaa xog kusaabsan Talaalka.

## Ilmo iska soo rididda

Wadanka Swiserlaan waala ogolyahay 3-da bilood ee ugu horaysa uurka in ilmaha la iska xaaqo. Dhammaadka usbuuca 12-aad ee uurka waxaa macquul ah kaliya in la iska soo ridi karo hadii ay hooyadu caafimaad jir ahaan ama maskaxeed ay halis ugu jirto. Taasina waxaa cadeyn karo kaliya dhaqtarka. Qofkii ku fikiro inuu iska soo daadiyo ilmaha waxuu xaq uleeyahay talooyin bilaash ah. Haweenka ka yar 16 sano waa inay u tagaan xarun latalin oo ay joogaan dad taqasus u leh. Kharashaadka ku baxayo dhammaan adeegyadan caafimaad waxaa bixinayo Ceymiska Caafimaadka.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gesundheit/schwangerschaft--geburt

# Caafimaadka Dhimirka

Wadanka Swiserlaan Xanuunada Maskaxda iyo Jirka lama kala saaro. Ceymiska Caafimaadka waxuu bixiyaa kharashaadka daaweynta xanuunada maskaxda ee Dhaqatiirta ku taqasustay arimahaas iyo waliba kharashaadka lagu seexiyo Isbitaalada dhimirka.

## Talo iyo Taageero

Xaaladaha adag ee gaarka ah ama qoyska waxa jiro Swiserlaan dad badan oo khibrad u leh oo kaa caawinayo. Ceymiska Caafimaadka (Grundversicherung) waxuu siiyaa dadka sharciyan la aqoonsanyahay in ay daweeyaan cudurada dhimirka kharashaadkii ay kula tacaaleen bukaanada. Kharashaadka lagu seexiyo bukaanada isbitaalada iyana way bixiyaan. Qofkii qabo dhibaato waxuu si bilaash ah oo waliba qarsoodi ah ula xiriiri karaa xarumaha latalinta. Isku tagga Swiiska ee Gacanta furan (Dargebotene Hand) ayaa kula talinayso qaab taleefan, I-Meeyl ama Wada sheekeysi online ah (Telefon 143, www.143.ch). Sidoo kale Dhaqtarada ama Dhaqtarka Guriga (Hausärztin oder Hausarzt) ayaa kusii caawin karo. Hadii qof uu halis ugu jiro, naftiisa ama nafkale inuu wax yeelo, waa in si dhaqso ah wax looga qabtaa. Xaaladan oo kale Booliska ayaa caawinaya (lambarka taleefanka 117).

## Caruurta iyo dhalinyarada

Dhalinyarada qabta dhibaatoyinka dhimirka halka ugu horeysa ee ka helayaan adeegga caafimadka maskaxda waa iskuulka (Schulpsychologischer Dienst). Sidoo kale waalidka ka walwalsan caruurtoda waxay iska qori karaan halkaas. Caawin qarsoodi iyo bilaash ah waxay ka heli karaan caruurta iyo dhalinyarada lambarka degdeg ah (Tel. 147, www.147.ch) ama waxay u qori karaan I-Meeyl ama kula sheekeysan karaan onlineka. Caruurta iyo dhalinyada la kulmo xaaladaha dhimirka ee degdegta ah waxay la xiriiri karaan dhaqtarka dhimirka dhalinyarada ee xaaladaha degdega ah (Kinder- und Jugendpsychiatrie) oo laga wici karo 061 325 51 00

## Xanuunada Balwadaha laga dhaxlo

Xanuunada Balwadda waxaa kaa caawinayo Balwad caawiyaha gobolka Basel (Suchthilfe Region Basel) iyo Xarunta wacyigelinta balwadda dadka dhaqamada kala duwan ee labada Basel (Multikulturelle Suchtberatungsstelle, MUSUB). Xarumahan waxay bixiyaan talooyin iyo taagero oo bilaash iyo qarsoodi ah. Sidoo kale haddii aad ka walaacsantahay ehelkaaga iyo dadka kuu dhow, waad la xiriiri kartaa xarumahaan. Kuwani waxay bixiyaan sidoo kale Talooyin luqado kale ah. Xanuunada Balwadda ma ahan kaliya kuwa, Khamriga ama Maandooriyaha. Sidoo kale Balwadaha kale ee lala xanuunsado sida, Balwadda Ciyaaraha, Balwadda Dukaameysiga ama Balwadda Internetka iyo Cunto xumida way kaa caawinayaan xarumahaan. Su'aalaha waxaa lagu soo gudbinkaraa sidoo kale I-Meeyl.

## Mahadhada Murugada leh

Qofka noloshiisa la kulmo wax aad xun oo uu iloobi karin waxuu raadsan karaa caawin. Sababtoo ah Mahadhooyinka dhibta ee aan maanka ka tirmin waa nooc kamid ah xanuunada dhimirka ee aan la dhayalsan karin. Marka laga soo tago adeegyada Talosiinta iyo taagerada ee dhibaatooyinka maskaxda iyo xanuunada waxaa kaloo jiro xarumo u gaar ah la tacaalida Dhibanayaasha dagaalada iyo jirdilka la kulmay.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gesundheit/psychische-gesundheit

# Geerida

Marka qof kamid ah reerkiina uu geeriyoodo waa inaad lasocodsiisaan dowlada. Hadii aad u baahantihiin waxay idiin wacayaan dowladu adeega Xabaasha. Howladeenada xabaasha waxay u geynayaan qabriga ama meel ka baxsan wadanka (dibada).

## Diiwaanka Geerida

Marka qof reerkina kamid ahi geeriyodo, waa in dhaqtarka uu soo buuxiyo warqada cadeeynta geerida. Kadib waa inaad Xafiiska arimaha Bulshada ee Gobolka Basel-Stadt ka diiwaangelisaa.
Qofka waxuu ku geeriyooday Isbitaal, Goobaha lagu daryeelo waayeelka ama Guryaha daryeelka:

- Maamulka Isbitaalka ama goobahaas ayaa ah inay wargeliyaan Xafiiska arimaha Bulshada.

Qofka waxuu ku geeriyooday goob kale:

- Adiga ka ehel ahaan ayaa lagaa rabaa inaad lasocdsiiso geerida Xafiiska arimaha Bulshada ee Gobolka Basel-Stadt.

Qof walba oo ku nool Gobolka Basel-Stadt, waxuu bilaash ku helayaa in lagu aaso markuu dhinto dhulka ama lagubo meydkiisa.

## Dhoofinta maydka

Waxaa macquul ah in qof kamid ah qoyskiina uu ku geeriyoodo Gobolka Basel-Stadt. Laakin waxaad doonaysaan in qofkaas lagu aaso dibadda. Hadaba waa in Shirkad xabaasho maydka oo la aqoonsanyahay ay soo saaraan warqad nidaamsan. Warqadan waxaa la yiraahdaa "Nidaamka naxashyada iyo sanduuqa daabulidda". Waa inaad tustaa warqadaan xafiiska xabaasha ee Gobolka Basel-Stadt. Kadib xafiiska waxuu ku siinayaa basboorka maydka. Warqadaas kaliya ayay shirkada dhoofiso meydka ugu qaadi kartaa qofka dhintay dibadda. Qarashaadka ku baxo ehelka marxuumka ayaa iska bixinayan.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gesundheit/geerida